

# Daraasadda **GENVASC** iyo Baadhista Caafimaadkaaga NHS

## *Warqadda Xogta Gaaban*

Ma jeclaan lahayd inaad naga caawiso xog-raadinta si loo xalliyo **xanuunka wadnaha**?

Marka aad qadanayso baadhista caafimaadkaaga NHS waxaan jeclaan lahayn inaan kugu casuunno in aad ka qayb-gasho daraasadda GENVASC. Waxaad qaadanaysaa baadhista caafimaadka si loo qiimeeyo khatarta xanuunka wadnahaaga ama dhibaatooyinka kale ee wareegga dhiig. Baadhistu waxay samaysaa baadhidda tijaabada dhiiggaaga iyo baadhidda cunsurada taasoo aan ognahay inay fursad u helaya xanuun ku dhaca wadnahaaga, sida da'daada, sinjiyadda, dhiig karka, heerka kalestaroolka iyo inaad sigaar cabto ama leedahay macaan iyo in kale.

Dhamaan waxyaabahaan waa muhiim inay naga caawiso si loo aqoonsado kuwa ku sugan khatarta sare waxayna noo ogolaan tilaabooyinka xagamaynta in la qaado goor hore.

Hase yeeshee, baadhitaanadan ma ahan kuwo heer sare ah dad ka qaarna kuwaas oo lagu cadeeyay khatar hoose ama dhexdhexaad ah ayaa wali sii haysta dhibaatooyin wadne. Tani sababtu waa cunsuro kale ayaa shaqeeya, tusaale ahaan xanuunka wadnaha wuxuu u muuqdaa inuu ugu dhaco noqnoqosho badan qoysas dhawr ah, sidaa darteed firka iyo DNA waxay sidoo kale ka ciyaaraan qayb kordhinta koridda khatarta xanuunka wadnaha.

Waa maxay dhamaan wax ku saabsan Daraasadda **GENVASC**?

Hormar badan oo la sameeyay dhawaanahan aqoonsiga firka taasoo saamaysa khatarta xanuunka wadnaha. Daraasadda GENVASC (soo gaabinta Firsiga iyo Barnaamijka Baadhista Caafimaadka Wadne) waxaa ka qayb-gala kumanaan qof sida adiga oo kale ujeedaduna waa in la baadho in ay ku jirto xogta firsiga khataraha kale ee la baadhay, waxay gacan ka gaysan kartaa hormarinta saadaasha qofka khatarta ku sugan kordhidda xanuunka wadnaha.

Maxaa ka **qayb-galaya**?

Ka qayb galidda daraasadda xaqiiqdii way fududahay maadaama ay ku jirto baadhista caafimaadkaaga.

Dhamaan waxa aad u baahantahay inaad samayso waa saxiixidda foomka ogolaanshaha noo ogolaanaya inaan adeegsano xogaa xogtaada daawada si qarsoodi ah ee xog-raadinta ooy noo siiso tijaabo dhiig. Xaaladaha ugu badan tijaabada dhiig waxaa la qaadaa wakhtiga tijaabada baadhista caafimaadkaaga mana jiraan dabagal booqashooyin ama daawayn dhacda

Maxaa ku dhici doona **tijaabadayda dhiigga** iyo macluumaadka?

Tijaabadaada dhiigga iyo macluumaadka waxaa lagu kayd in doonaa si xafidan Qaybta Xog-raadinta Caafimaadka Wadnaha Leicester NIHR ee adeegsiga daraasadda.

Sideen ku ogaan ka **qayb-qaadashadayda** daraasaddan inay ahaan doonto qarsoodi?

Ka qayb-qaadashadaada daraasaddan waxay ahaan doontaa qarsoodi maadaama oo lagu siin doono lambar daraasad oo gooni ah. Xog-raadiyayaasha kuwaas oo baadha dhiiggaaga waxay kali ah ooy ogaan doonaan lambarkaaga, ma ahan magacaaga.

**Xog dheeri ah** oo ku saabsan sababta xog-raadintan muhiimka ah loo fulinayo, fadlan akhri faafaahinta lagu qoray warqadda xogta ka qayb-qaataha. Haddii aad doonaysid inaad ka tanaasusho ka dib marka aad akhriso warqadda xogta faahfaahsan ama sabab kastaba wakhti ka dib xor baad u tahay inaad sidaas samayso, ayadoon waxba u dhimaynin daryeelkaaga ama xuquuqdaada sharci.

Ka qayb galiddu waa ikhtiyaari, laakiin fadlan ku soo biir. Natiijadu waxay ku xidhantahay dad badan oo doonaya inay ka qayb galaan waxayna aad muhiim ugu noqon doontaa caawinta in la badbaadiyo noolasha mustaqbal.